# Soo gelidda dalka iyo ka dhaafidda karantiilka: Xeerarka soo gelidda Norway

Dadka tallaal buuxa qaatay iyo kuwa uu cudurka koroonuhu ku dhacay lixdii bilood ee u danbeeyay waa laga dhaafayaa karantiilka safarka. Waxaa shardi ah in ay wataan shahaadada koroonaha ee norwiijiga. Dhammaan dadka kale ee Norway yimaada weli sida caadiga ah waa in ay karantiil galaan. Weli dhammaan dadka dalka soo gala xudduudka ayaa looga qaadayaa tijaabada koroonaha. Xataa kuwa hadda laga dhaafay karantiilka safarka waa laga qaadayaa tijaabada. Eeg tusmada xeerarka soo gelidda dalka ee dhaqangelaya laga billaabo 11-ka juun saacadda 15.

Dawladdu waxay weli ku talinaysaa in aan loo bixin safarrada dibedda, xataa kuwa hadda laga dhaafay karantiilka safarka sidaas ayaa lagula taliyaa. Sababtu waxaa weeye in ay weli jirto halis weyn oo cudurku dibedda nooga imaan karo. Talooyinka safarku waxay soconayaan ilaa iyo 1-da luuliyo 2021.

Waxaa muhiim ah in qofku safarka ka hor ogaado xeerarka qaban doona marka uu Norway ku soo laabto. Waxaa sidoo kale loo baahan yahay in la ogaado xeerarka ka jira dalka loo safrayo. Xaaladda faafidda cudurka iyo xayiraadaha dalalka kala duwan labaduba degdeg ayay isu beddeli karaan.

Dadka safarka ah waa in ay safaf dhaadheer ku tala galaan xudduuduhu.

**Dadka tallaalka buuxa qaatay iyo kuwa uu koroonuhu ku dhacay lixdii bilood ee u danbeeyay:**
Dadka caddayn kara in ay tallaal buuxa qaateen ayaga oo dhiibaya shahaadada koroonaha ama in uu covid-19 ku dhacay lixdii bilood ee u danbeeyay, laga billaabo jimcaha 11-ka juun – saacadda 15 loogama baahna in ay galaan

karantiilka safarka. Ilaa iyo hadda shahaada koroonaha norweejiga oo keliya ayaa xudduudka habka QR lagu xaqiijin karaa. Sidaas ayay ahaanaysaa ilaa iyo inta laga helayo nidaam sanco oo aqbalaya shahaadooyinka ka soo baxa Midawga Yurub (EU) iyo kuwa Aagga dhaqaale ee Yurub (EØS), kaas oo diyaar noqon doono dabayaaqada bisha juun.
Dadka tallaal buuxa qaatay iyo kuwa uu cudurka koroonuhu ku dhacay lixdii bilood ee u danbeeyay loogama baahna in ay keenaan caddayn sheegaysa in tijaabo koroonaha looga waayay laga qaaday 24 saac ka hor intaysan Norway imaan, laakiin waa in xudduudka tijaabada looga qaadaa.

Xeerka guud waa in dadka oo dhan xudduudka tijaabo looga qaado, xataa kuwa hadda laga dhaafay karantiilka safarka. Haddii ay shaqaalaha shaqadu ku badato waxay hawlwadeennada xuduudku go’aamin karaan in dadka tallaal buuxa qaatay ama uu covid-19 ku dhacay ee caddayn kara, aan xuduudka tijaabo looga qaadin – laakiin waajib looga dhigo in ay tijaabada iska qaadaan laba maalin gudahood kaddib marka ay Norway soo galaan. Fursaddaan waa mid imaan karta keliya marka ay shaqaalaha shaqadu ku badato, qofka gaarka ahna xaq uma laha in uu iskiis u doorto in uu guriga iskaga qaado tijaabadi xuduudka looga qaadi lahaa. Agaasinka caafimaadka ayaa diyaarinaya tilmaamaha ay raacayaan shaqaalaha xudduudka marka ay qiimaynayaan awooddooda shaqo.

Dadka uu u billowday karantiil ay guriga ku gelayaan kaddib markii tijaabo cudurka laga waayay laga qaaday markii ay Norway yimaadeen islamarkaana caddeeyay in ay tallaal buuxa qaateen ama in uu covid-19 ku dhacay, karantiilka waa laga dhaafayaa laga billaabo 11-ka juun saacadda 15.

***Dadka tallaal buuxa qaatay:***

1. dadka qaatay labo cirbadood oo tallaal ah oo ay cirbaddii danbe ka soo wareegtay muddo hal toddobaad ah
2. tijaabo lagu baaray shaybaar la aqoonsan yahay oo caddaysay in uu ku dhacay SARS-CoV-2, kaddib na ugu yaraan 3 toddobaad tijaabada kaddib qaatay hal cirbad oo tallaal ah – waxaa tallaal buuxa la helayaa 1 toddobaad tallaalka kaddib.

3. qaatay cirbaddii 1aad ee tallaalka, tijaabo lagu baaray shaybaar la aqoonsan yahayna oo caddaysay in uu SARS-CoV-2 ku dhacay ugu yaraan 3 toddobaad tallaalka kaddib, islamarkaana ka baxay gooni isu soocii.
   *Cudurku ku dhacay:* covid-19 ku dhacay 6-dii bilood ee u danbeeyay oo laga billaabayo markii laga baxay gooni isu soocailaa marka6 bilood ka soo wareegtay taariikhdii tijaabada la qaaday.

**Dadka qaatay hal cirbad oo tallaalka ah**
Dadka qaatay hal cirbad oo tallaalka ah laga dhaafi maayo karantiilka safarka.

**Dadka qaatay cirbadda 1-aad ee tallaalka iyo carruurta ka yar 12 sano oo loo soo gaabinayo karantiilka safarka**
Carruurta iyo dhallinyarada ka yar 18 sano way ka bixi karaan karantiilka safarka haddii tijaabo PCR ah oo cudurka laga waayay laga qaado saddex maalmood kaddib marka ay dalka soo galaan.
Waxaa sidaas oo kale samayn kara dadka qaatay cirbadda 1-aad ee tallaalka, oo ay 3 ilaa 15 toddobaad ka soo wareegtay markii la tallaalay. Si qofka xeerkan wax looga dhaafo waa in qofku haystaa shahaadada koroonaha ee norwiijiga.

**Hoteelka karantiilka**
Dadka karantiilka gelaya marka ay Norway yimaadaan, sida caadiga ah waa in ay muddada karantiilka oo dhan ama qayb ahaan joogaan hoteelka karantiilka.
Dhammaan dadka ka imaanaya dalalka ka baxsan EØS/Schengen iyo Ingiriiska waa in ay muddada karantiilka oo dhan ku qaataan hoteelka karantiilka. Warbixinta hoteelka karantiilka

**Foomka soo gelidda dalka**
Xeerka guud waa in ay foomka soo gelidda dalka buuxiyaan dhammaan dadka safarka ah oo ay ku jiraan kuwa tallaalka buuxa qaatay iyo kuwa uu ku dhacay covid-19 ee haysta shahaadada koroonaha ee norwiijiga.

**Qorshaha dib u furidda dalka**
Qorshaha dawladda ee dalka sida tartiib tartiibta ah dib loogu furayo ayaa noqonaya mid la isku hallayn karo oo lagu xaddidayo faafidda cudurka.
Qorshaha dib u furistu wuxuu ka kooban yahay afar heer. Safarrada dibedda

lagu tegayo waxaa looga hadlay heerka ugu danbeeya. Heerka afraad waxyaalo badan ayaa noqon kari doona si ku dhow sidii caadiga ahayd. Laakiin waa dhici kartaa in ay weli xayiraado saarnaadaan soo gelidda dalka, weliba dadka ka soo gelaya dalalka ka baxsan aagga EØS. Waa in lagu xisaabtamaa in dadka ka imaanaya meelaha qaarkood in laga dalbo in ay karantiil galaan oo tijaabo laga qaado.

Heerarka iyo xeerarka soo gelidda dalka waxaa had iyo jeer la qiimeeyaa ayada oo lagu salaynayo xaaladda faafidda cudurka iyo heerka tallaalka. Xawaaraha dib u furidda dalku wuxuu ku xiran yahay macluumaadka la hayo ee kuma xirna taariikho.

Qorshaha dawladda ee dib u furidda dalka